

## Qaadashada fiican ee daawada

[English](#) | [Tiếng Việt](#) | [Español](#) | [Русский](#) | [မြန်မာ](#) | [Lus Hmoob](#) | [አማርኛ](#)

**Waraaqda dadweynaha:** 3/6/24

Boggan waxaa ku qoran tilmaamo lagu caawinayo qofka wakhtiga uu qaadanayo daawada dhimirka oo dhan ama nooc kale oo daawo ah.

### **Waa in la uruuriyo xogta iyo in la sameeyo dibu-eegis joogto ah oo qorsheysan**

Xirfadlaha daawada qoraya waa in uu si joogto ah oo habeysan dib ugu eego daawooyinka qofka isagoo isticmaalaya macluumaadka ay soo ururiyeen qofka iyo kooxda caawineysa.

Xirfadlaha daawada qoraya waa in uu dib u eego tilmaanta, waxtarka, waxyeellada iyo baahida jirta si qofka loogu sii wado daawada. Xogta la soo ururiyey iyo fahamka isbeddellada xogta qofka ee muddo ka dib ayaa caddeyn u noqoneysa horumarka qofka iyo fursad xal u ah dhibaataada markaysan jirin horumar fiican.

Dibu-eegista joogtada ah, marka uu dakhtar sameeyo waxaa lagu ogaanayo waa haddii ay daawada dhimirka waxtar u leedahay maareynta calaamadaha qofka iyo in ay tayada nolosha ee qofka u soo fiicnaatay. Daawadu ma fiicna haddii ay caawineyso xaaladdii loogu talagalay balse ay sidoo kale leedahay saameyn xun (tusaale, marka ay ka hortageyso in uu qofka gaaro yoolalkiisa, markay keento xanuun ama ay qofka u diideyso in uu ka qeybgalo wax uu sameyn lahaa). In la soo uruuriyo oo la eego xogta calaamado gaar ah (u tixraac [Buugga Daawooyinka Dhimirka – Diyaarinta ballamaha](#)), kooxda caawisa qofka waa in ay si joogto ah ula socdaan arrimaha kale ee la xiriira tayada guud ee nolosha qofka (u tixraac [Buugga Daawooyinka Dhimirka – Qiimeynta tayada nolosha](#)).

Shaqaalaha 245D waxa ay isticmaali karaan jaantuska hoose si ay uga hadlaan xogta ku saabsan calaamadaha uu yoolku yahay iyo tayada nolosha ee xoogga la saarayo.

<b>Calaamadaha yoolka</b>	<b>Tayada nolosha</b>	<b>Miyey daaweyntu shaqeyneysaa?</b>
Yareyn	Ka-darid	Maya
Yareyn	Caadi	Siday u muuqato
Yareyn	Roonaansho	Haa (natiijo fiican)
Caadi	Ka-darid	Maya
Caadi	Caadi	Maya
Caadi	Roonaansho	Siday u muuqato

Kordhin	Ka-darid	Maya
Kordhin	Caadi	Maya
Kordhin	Roonaansho	Maya

### **Waa in daawada loogu qoro qiyaasta ugu waxtar badan**

Natijada ugu habboon ee dawooyinka dhimirka ee uu qofku qaadanayo waa in ay u kororto tayada nolosha iyo inta jeer iyo/ama xoogga calaamadaha yoolka ah si loo yareeyo muddo ka dib. Haddii daawada lagu gaaro natijoooyinkii la rabay, qofka iyo kooxda caawineysa (haddii ay khuseyso) waa in ay la kulmaan dhakhtarka si ay ugala hadlaan mustaqbalka iyo si loo go'aamiyo in qiyaasta daawada hadda in ay tahay qiyaasta ugu yar ee ugu waxtar badan. Natijoooyinka fiican uma baahna in laga yareeyo intii jeer ee uu qofku qaadanaayey. Xaaladaha qaarkood, qofka ayaa gaari kara natijoooyin ka sii fiican marka loo sii wado qiyaas hore intii lagu tijaabin lahaa in marar badan lagu celceliyo yareynta daawada.

Go'aamada lagu beddelayo daawada waa in ay ku saleysan yihiin talooyinka dhakhtarka daawada qoray iyo qofka:

- Xaalad(ihiisa).
- Jawaabta daaweynta.
- Taariikhda daawada.
- Oggolaansho ah in la sii wado ama la joojiyo daaweynta.
- Isbeddel mar dhow ku yimid caafimaadka iyo habka nolosha.

Haddii uu dhakhtar ku taliyo in la yareero ama la joojiyo daawada oo ay qofka iyo kooxda caawisa raalli ka noqdaan go'aankaas, DHS guud ahaan waxay ku talineysaa in si tartiib ah loo yareeyo (intii degdeg laga dhigi lahaa) si loo dhimo saameynta inta ay ka baxayso waxyeellada daawada iyo in lala socdo calaamadaha ka sii dari kara. Dhakhtarku waa in uu dib u eego intii hore ee la isku soo dayey yareynta daawada ka hor inta aan go'aan laga gaarin in wax laga beddelo daawada.

### **Taageerada dadka marka ay jirto shaqaale-yaraan**

Mararka qaarkood, shaqaalaha adeegga ee 245D ayaa go'aamin kara sida loogu caawinayo qofku in uu gaaro madaxbannaani oo waa in si tartiib ah looga yareeyo taageerada.

Wakhtiyada kale, dhakhtarka ayaa qorsheyn doona isbeddelka shaqaalaha iyo habka lagula wadaagayo shaqaalaha cusub macluumaadka si aysan dhibaato jirtay qofka ugu soo noqon.

Waxaa jira siyaabo badan oo ah qorshe meelgaar ah. Hal wax oo lagu caawin karo shaqaalaha cusub waa hal-bog, qoraal ka hadlaya hal qof oo waa macluumaadka muhiimka ah qofka (u tixraac [Helen Sanderson Associates – Faahfaahinta halka-bog](#)).

### **Tasiilaadyo dheeraada**

[Psychotropic Medication Manual](#)

[Psychotropic Medication Manual – Bilaabista dawooyinka](#)